waa marka dhakhaatiirtu ay tixgelin doonaan qiyaasta labaad ee daawada methotrexate ama qalliin.

Waxa kale oo muhiim ah in laga feejignaado calaamadaha uurka ektoobiga ee sii xumaanaya sida ku xusan qaybta kore.

## Maxaan samayn karaa si aan u caawiyo daaweynta?

Waa inaad joojisaa qaadashada wax fiitamiinno ah, macdan, ama daawooyin kale ah ilaa ay kuu sheegaan dhakhaatiirta ku daaweyneysa inaad qaadato, maadaama qaarkood ay faragaliyaan saamaynta daawada methotrexate. Waxaa si gaar ah muhiim u ah inaadan qaadan wax kaabis folic acid ah oo aad iska ilaaliso cuntooyinka hodanka ku ah folic acid ilaa ay dhakhaatiirtaadu hubiyaan in dawadu shaqaysay oo heerka hoormoonka hCG uu ku noqday heerarka marka aan uur jirin.

Waa inaadan qaadin wax culus ama qaban shaqada guriga ilaa heerarka hCG ay si joogto ah hoos ugu dhacayaan waana inaad sameysaa jimicsi fudud, sida socodka, ilaa hCG uu ku noqdo heerarka marka aan uur jirin.

Waa inaad ka fogaataa galmo ilaa hCG-gaagu ku noqdo heerarka marka aan uur jirin.

Dadka intiisa badani waxay fasax ka qaataan shaqada marka hore mana ku noqdaan shaqada ugu yaraan laba toddobaad inta daaweyntu shaqaynayso. Boggayaga internet-ka waxa ku jira macluumaad ku saabsan uurka ektoobiga iyo goobta shaqada.

Toddobaadka ugu horreeya, waxaa muhiim ah in laga fogaado xanuun baabi'yayaasha kuwada jira kooxda NSAID sida ibuprofen. Xanuun baabi'yaha la doorbidaa waa paracetamol.

Waa inaad ka fogaataa cabbitaanka khamriga ilaa hCG uu ku noqdo heerarka marka aan uur jirin oo aadan cabin khamri dhowr toddobaad ka dib.

## Waa maxay taxaddarrada ay tahay inaan sameeyo mustaqbalka?

Os ydych wedi cael naill ai un neu ddau ddos Haddii aad qaadatay mid ama laba irbadood oo ah daawada methotrexate, waa inaad sugtaa ilaa heerarka hCG -gaagu hoos uga dhaco 5mIU/mL (dhakhtarkaagu wuxuu kula talin doonaa marka tani la gaadho isaga oo ka eegi doonna hCG-gaaga dhiigga ama kaadida) ka dibna qaado kaabis folic acid ah toddobaadyo ka hor intaadan isku dayin inaad uuraysato.

Tani waxa loo samaynayaa sababta oo ah daawada ayaa laga yaabaa inay hoos u dhigto heerka folate-ka ee jirkaaga kaas oo loo baahan yahay si loo hubiyo in ilmuhu u koro si caafimaad qaba. Tusaale ahaan, waxay keeni kartaa in ilmuhu yeesho cillad tuubada neerfaha ah sida faruur, faruur illa sanqaroorka ah ama in xanguluhu ka soo baxo dhabarka. Daawada si dhakhso ah ayaa loo dheefshiidaa laakiin waxay saamayn kartaa tayada unugyadaada, oo ay ku jiraan kuwa ukuntaada, iyo tayada dhiiggaaga illaa 3 ama 4 bilood kadib marka la qaato. Daawadu waxay kaloo saamayn kartaa habka beerkaagu u shaqeeyo sidaa darteed waxaad u baahan tahay inaad jidhkaaga siiso wakhti uu si fiican ugu soo kabto ka hor inta aadan uur cusub ka fikirin.

## Dareenkaaga

Dadka badankood, ka dib markay la kulmaan dhacdo adag, waa jawaab dabiici ah inay isku dayaan inay macno u yeelaan waxa dhacay iyo sababta ay u yeeshen uurka ektoobiga. Isku dayga inaad fahanto sababta aad u yeelatay uurka ektoobigu waxay noqon kartaa wax kugu abuura laacwaa maadaama inta badan ay xadidan yihiin ama xitaa aan lahayn jawaabaha su'aalaha.

Qaarkood waxay dareemaan dambi waxayna xitaa isku eedeeyaan inay "sababeen" ama gacan ka geysteen uurka ektoobiga. Waxaa muhiim ah in aad qirto in aysan jirin wax aad sameyn kartay si aad u joojiso dhicitaanka uurka ektoobiga iyo in aadan adigu khaladka lahayn. Maad lahayd ikhtiyaar kale oo aan ahayn in lagaa daaweeyo uurkaaga ektoobiga maxaa yeelay waxay halis gelin lahayd noloshaada haddii aan laga daaweyn lahayn.

In ka badan kala badh uurka ektoobiga ee Boqortooyada Midowday(UK), ma jirto khatar la og yahay ama waxyaallo keeni karat uurka ektoobiga.

## Dareenka lammaanahaaga

Uurka ektoobigu waxa uu sidoo kale saameeyaa lammaanayaasha. Iyaga oo isku dayaya inay ka baaraandegaan waxa ku dhacay naftooda, waxay isla markaa isku dayi karaan inay ku siiyaan taageero ka dib markay arkaan dhibta jidheed iyo shucuureed ee aad martay.

Lammaanahaaga ayaa laga yaabaa in uurku uusan saamayn. Waxaa laga yaabaa inay isku dayayaan inay wax ka qabtaan falcelintooda shucuureed ee ku aadan uurka lumay markhaatinna ka noqonaya dhaawaca soo gaadhay jirkaaga iyo dareenkaaga.

Dadka qaar, waxaa laga yaabaa in ahmiyadda lamaanuhu adiga uu yahay halkii uu ka ahaan lahaa uurkii lumay taasina waxay noqon kartaa meel la isku afgaran waayo. Mararka qaarkood lammaanahaaga ayaa laga yaabaa inay ku adkaato inuu fahmo dareenkaaga waxaadna u malayn kartaa in lammaanahaagu uusan ku taageerayn sidii aad jeclaan lahayd.

Lammaanayaashu waxay isku dayi karaan inay "wax hagaajiyaan" ama waxay rabi karaan inay ka fogaadaan ka hadalka waxa dhacay ama soo hadal qaaditaanka mowduuca xanuunka badan. Sababtu maahan inaysan danaynayn laakiin waxay rabaan inay "wax hagaajiyaan". Iyada oo inta badan ahmiyadda adiga lagu saarayo, waxay sidoo kale dareemi karaan in laga tegey oo la iska indho tiray. Lammaanayaashu sidoo kale waxay la kulmi karaan dhibaatooyin nafsiyeed ka dib uurka ektoobiga sida walbahaarka dhibaatada ka dib.

Waxaa muhiim ah, marka aad dareento inaad awooddo, inaad lammaanahaaga kala hadasho dareenkaaga iyo dareenkooda labadaba. Waxaan sidoo kale halkan u joognaa inaan ka taageerno lammaanayaasha dhibka uurka ektoobiga.

## Sidee Hay'adda Uurka Ektoobigu u bixin kartaa taageero

Hay'adda Uurka Ektoobigu waxay bixisaa macluumaad waxayna taageertaa kuwa waaya uurku marka uu ku jiro marxaladaha ugu horreeya, oo ay qabsato masiibada uurka ektoobigu.

Markay timaaddo Hay'adda Uurka Ektoobiga, in badan oo naga mid ah waxay soo mareen dhaawac jireed iyo mid shucuureed oo uu sababay uurka ektoobigu sidaa darteed waan fahmaynaa oo u damqanaynaa sida adiga iyo kuwa aad jeceshahay dareemaysaan hadda. Waxaa laga yaabaa inaad dareento cidlo, wareer, iyo culays. Waxaa laga yaabaa inaad qabtid su'aalo ku saabsan waayo-aragnimada iyo waxa dhici doona, jir ahaan iyo dareen ahaanba. Waxaan halkan u joognaa inaan ku taageerno.

Boggayaga internet-ka waxa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan soo kabashada jireed iyo shucuureed kadib uur ektoobiga. Degelka waxa ku jira xog caafimaad oo saxa sidoo kale waxaa ku jira macluumaad ku saabsan adeegyadayada taageerada kala duwan halkaas oo aad nala wadaagi karto khibradahaaga su'aalana na weydiin karto. Haddii aad u malaynayso inaan ku caawin karno, fadlan booqo degelkeena, iimayl noo soo dir ama na soo wac.

Fadlan booqo ectopic.org.uk si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo taageero.



Somali

# Ku Daawaynta Daawo

Medical Management

The Ectopic Pregnancy Trust

Publication date: November 2021

Registered with FUNDRAISING REGULATOR

Website: ectopic.org.uk
Helpline: 020 7733 2653
Email: ept@ectopic.org.uk

Registered charity number:1071811

For healthcare professionals: To request further leaflets, please contact leaflets@ectopic.org.uk or call 020 7096 1838 or text to 07537 416085

The Ectopic Pregnancy Trust

Waan ka xunnahay in xirfadlahaaga daryeelka caafimaad uu kugu wargeliyay inaad leedahay uur ektoobiga.
Waxay noqon kartaa waqti caadifad ahaan iyo jidh ahaanba adag waxaana laga yaabaa inaad qabtid su'aalo ku saabsan daaweyntaada iyo waxa kugu dhici doona. Waxaa jira siyaabo kala duwan oo uur ektoobiga loo daaweyn karo markaa, waxa aan waraaqdan kaga hadli doonaa oo kaliya su'aalo la xidhiidha **ku daawaynta uur ektoobiga** daawo.

Waxaad macluumaad dheeraad ah iyo taageero ka heli kartaa halkan www.ectopic.org.uk.

## Waa maxay ku daawaynta daawada methotrexate?

Ereyga 'ku daawaynta daawo, marka lala isticmaalo uur ektoobiga, waxaa loola jeedaa adeegsiga daawo la yiraahdo methotrexate. Folate waa fiitamiin lagama maarmaan ah oo loo baahan yahay si loo caawiyo unugyada uurka ee sida degdeg ah u qaybsamaya methotrexate-na waa daawo awood leh oo si ku-meel-gaadh ah u fara-gelisa hawsha folate ee jidhka. Daawado waxay joojisaa uurku inuu sii kobco oo si tartiib tartiib ah ayuu dib jidhku u nuuga uurka iyada oo ugxan-mareenkuna meeshisa joogo.

Methotrexate ayaa ugu waxtarka badan marxaladaha hore ee uurka, badiyaa marka hormoonka uurka 'beta hCG' uu ka hooseeyo 5000 mIU/mL. Khatarta dillaacu waxay ku badan tahay uurarka leh heerar ka badan tan. Si kastaba ha ahaatee, uurka ektoobiga ee ku yaal ugaxan-mareenka dhinaca xigta ilmo-galeenka, ma aha wax aan caadi ahayn in la isku dayo in lagu daweeyo uurkaas ektoobiga daawada iyada oo heerarka hCG ee jirku sarreeyaan. Uurka ektoobiga, dhab ahaantii maahan marxaladda uurka (sida tirada toddobaadyada uurka), laakiin waxa weeye cabbirka ektoobiga, waxa kala duwanaan kara dhowrka toddobaad ee ugu horreeya iyadoo ku xiran tahay heerka koritaanka, taasina waa muhiim.

## Waa maxay methotrexate?

Methotrexate waa daawo awood leh oo qaabka ay u shaqaysaa tahay, inay si ku meelgaar ah, u farageliso habka jidhkaagu u sameeyo fiitamiin la yiraahdo folate. Folate ayaa loo baahan yahay si loo caawiyo unugyada sida degdeg ah u qaybsamaya - sida kuwa uurka. Daawado waxay joojisaa uurku inuu sii kobco oo si tartiib tartiib ah ayuu dib jidhku u nuuga uurka iyada oo ugxan-mareenkuna meeshisa joogo.

## Goorma ayaa ku daaweynta methotrexate ugu habboon tahay?

Mae'r driniaeth hon yn fwy addas i rai na'i
Habkan daaweynta ayaa ku habboon dadka qaar uun waxayna u badan tahay in ay guuleysato haddi la helo duruufahan soo socda:
Caafimaad baad ku jirtaa
Ugxan-mareenku mu dillaacin
Heerkaaga hCG ayaa in caadi ah hoos u dhacsan (isbitaalkaagu malaha wuxuu lahaan doonaa heer ka sarreeya oo aan habkan la isticmaali doonin)
Ma jiro dhiig -bax weyn oo caloosha ah

Sababtoo ah ma keenayo qalliin, habkani wuxuu faa'iido gaar ah ka leeyahay qalliinka haddii:
Waxaad qabtaa dhibaatooyin caafimaad oo kale kuwaas oo kordhin kara halista suuxinta guud
Haddii cadka calooshaada ama miskahaagu isku dhegayaan (taasi oo ka ay keentay qaliin hore ama caabuq)
Uurka ektoobigu wuxuu ku yaal qoorta ilma -galeenka ama halka ay iska galaan ilma-galeenka iyo ugxan-mareenku.

Ku daaweynta uurka ektoobiga daawada methotrexate ma habboona haddii aad la il' daran tahay mid ka mid ah xaaladaha soo socda:

- Caabuq socda
- Dhiig-yaraan daran ama yarida unugyada kale ee dhiigga
- Dhibaatooyin kalyaha ah
- Dhibaatooyin beerka ah
- Caabuq uguba
- HIV/AIDS
- Boog calooleed ama ulcerative colitis

## Muxuu dhakhtarkaygu u doonayaa inuu sidan iila dhaqmo oo uusan isiin doorashada qalliinka?

Daaweyntan waxaa loo sameeyay si looga fogaado qalliin waxayna dhakhaatiirtu doorbidaan inay isticmaalaan daawada methotrexate haddii ay faa'iido gaar ah ka leedahay qalliinka. Tusaale ahaan, haddii:

- Aad leedahay uur ektoobiga oo ay adag tahay in lagu daaweeyo qalliin lehna halista dhiig-baxa culus;
- Ay cadka calooshu ama miskuhu isku dhegayaan (taasi oo ay keentay qaliin hore ama caabuq)
- Waxaad qabtaa dhibaatooyin caafimaad oo kale kuwaas oo kordhin kara halista suuxinta guud

Waxaad leedahay ikhtiyaar marka ay timaado daaweyntaada xirfadlayaasha caafimaadkuna had iyo jeer way ku farxi doonaan inay kaala hadlaan dhammaan xulashooyinka daaweynta. Haddii aad dareento in maareynta caafimaad aysan dareen ahaan kugu habboonayn, waa inaad kala hadashaa dhakhaatiirtaada oo aad awooddaa inaad doorato maareynta qalliinka.

Methotrexate ugu yaraan way u fiican tahay sida qalliinka marka la eegayo uur-ku -guulaysiga dambe. Tan waxaa laga yaabaa inay sabab u tahay xaqiiqda ah in daaweynta caafimaadku aysan ahayn mid waxyeello leh, halka qalliinku ku sababi karo xoogaa nabaro ah agagaarka ugxan mareenka.

## Sidee daawada loo bixiyaa?

Daawada waxaa lagu bixiyaa duritaan, badiyaa hal irbad oo muruqa badhida ah, si kastaba ha ahaatee, haddii loo baahan yahay in si kale loo qaato, tan ayaa lagaala hadli doonaa. Qiyaasta waxaa loo xisaabiyaa iyadoo loo eegayo dhererkaaga iyo miisaankaaga. Irbadda ka hor, baaritaanno dhiig ayaa la sameeyaa si loo hubiyo shaqada beerka iyo kelyaha iyo in la hubiyo inaadan dhiig-yari lahayn.

## Maxaa dhacaya inta lagu jiro daaweynta?

Datblygwyd triniaeth methotrexate er mwyn Habkan waxaa loo sameeyay si looga fogaado qalliin. Si kastaba ha ahaatee, waxay u baahan tahay kormeer taxaddar leh iyo dabagal. Taas micnaheedu waa inaad si joogto ah u tagto isbitaalka si loo baaro dhiigga si loola socdo heerarka hCG -gaaga ilaa baaritaannadu ay soo baxaan kuno taban. Tani waxay qaadan kartaa dhowr toddobaad, tanna waxaa kuu sharxi doona dhakhtarkaaga. Isbitaalkaaga ayaa kuu diyaarin doona si loo baaro heerka hoormoonka. Dhakhaatiirtaadu waxay caadi ahaan tijaabin doonaan heerarka hCG -gaaga maalinta daawada la bixiyo, mar labaad maalinta afraad, iyo maalinta toddobaad kadib duritaanka.

Heerka hCG wuxuu badiyaa kacaa maalinta afaraad ee baaritaanka dhiig maxaa yeelay ficilka daawada methotrexate ma ahan mid deg deg ah, sidaa darteed unugyadu waxay sii wadi doonaan inay kala qeybsamaan laba ama saddex maalmood ka dib markii duritaanka la bixiyay, unugyada qaarna waxay sii daayaan hCG badan markay bilaabaan inay baaba'aan . Dhakhaatiirtaadu waxay raadinayaan inay arkaan hoos u dhac ku yimaad qiimahaaga hCG ugu yaraan boqolkiiba 15% inta u dhaxaysa maalmaha afaraad iyo toddobaad. Haddii aysan dhicin hoos u dhac boqolkiba 15% ah, tani waa marka dhakhaatiirtu ay tixgelin doonaan qiyaasta labaad ee daawada methotrexate ama qalliin.

Dhowr maalmood ka dib duritaanka, waa caadi in la bilaabo dhiigbax oo dhiigbaxani wuxuu socon karaa inta u dhexeysa dhowr maalmood ilaa iyo 6 toddobaad.

3 ilaa 7 maalmood oo kasta, heerarka hCG beta ayaa la sii wadi doonaa in lala socdo si loo hubiyo inay si habboon u dhacayaan. Badidood waxay u baahan yihiin hal irbad laakiin ilaa rubuc ka mid ah kiisaska ayaa laga yaabaa in loo baahdo duritaan dheeraad ah haddii heerarka hCG ee dhiigu aysan hoos u dhicin.

## Waa maxay waxyeellooyinka ka imanaya daawadu?

Waxyeellooyi ugu badan ee daawada methotrexate waa:

- xanuun ubucda (caloosha) ah oo leh casiraad waa waxyeellada ugu badan, waxayna badanaa dhacdaa inta lagu jiro 2 ilaa 3 maalmood ee ugu horreya daaweynta. Maadama xanuunka calooshu uu sidoo kale calaamad u yahay uurka ektoobiga ee dillaacay, u sheeg wax kasta oo calool xanuun ah xirfadlahaaga caafimaad;
- daal - Dad badani waxay dareemaan daal aad u badan waxayna la yaaban daalka faraha badan ee ay la kulmaan inta lagu jiro daaweynta;
- dhiigbax ka yimaada xubinta taranka ama dhibco dhibco dhiiga;
- lalabo, matag, iyo dheefshiidka oo khalkhala;
- madax-wareer ama dawakhaad-Mar labaad, maadama tani sidoo kale tahay calaamad uu leeyahay uurka ektoobigu, fadlan u sheeg xirfadlahaaga caafimaad;
- Kabuubyo ama xanuun ka yimaad goobta badhida ee lagaa duray.

**Waxyeellooyinka kale ee dhifka ah ee ka yimaada ku daaweynta methotrexate uurka ektoobiga, waxaa ka mid ah:**

- Maqaarka oo dareenka iftiinka qorraxda u adkaysan kari waaya
- Caabuqa xuubka isha daboola
- Af iyo cuno xanuun
- Timo daadasho ku-meelgaar ah
- Tirooyinka dhiigga oo hoos aad ugu dhaca (xakamaynta dhuuxa lafta)
- Caabuqa sambabka (pneumonitis)

## Intee in le'eg ayay guul tahay ku maaraynta daawadu?

Heerarka guushu way kala duwan yihiin iyadoo ku xiran duruufaha daawada methotrexate loo bixiyay daraasaduhuna waxay soo sheegaan heerka guushu in uu u dhexeeyo 65-95%. Heerarka guusha waxay u muuqdaan inay sarreeyaan marka dadka la daaweeyo iyaga oo leh heerar beta hCG oo hooseye. Dhakhtarkaagu waa inuu awoodaa inuu kuu sheego heerka guusha daawada methotrexate ee isbitaalkooda.

## Sideen ku ogaanayaa haddii ay dhibaato jirto oo aan u baahanahay in si kale la ii daaweeyo?

Dhakhaatiirtaadu waxay awoodi doonaan inay kuu sheegaan haddii uurkaaga ektoobigu uusan baabi'in, maadaama tan lagu ogaan doono natiijooyinka baaritaanka hCG -gaaga caadiga ah. Haddii ay sidaas tahay, waxay kuu soo jeedin karaan qaddar dheeraad ah oo daawada methotrexate ah ama waxay kuu soo jeedin karaan qalliin.

Astaamaha uurka ektoobiga oo sii xumaanaya waxaa ka mid ah heerarka xanuunka oo kordha; dhiigbaxa ka yimaad xubinta taranka; neefta oo ku qabata; inaad dareentid suuxdin iyo/ama xanuun aad ka dareento caarada garabka iyo kuwo kale. Haddii aad isku aragto mid ka mid ah calaamadahan waxaad u baahan doontaa in dib lagu qiimeeyo. Isbitaalkaagu wuxuu ku siin doonaa lambar aad kala soo xiriiri karto si aad talo caafimaad u hesho haddii aad dareento in wax is-beddelayaan ama lagaa doonayo inaad timaado waaxda Shilka iyo Gurmadka (A&E). Haddii aan laguu sheegin waxa ay tahay in aad samayso oo aad u baahan tahay inaad qof la hadasho, wac waaxda isbitaalka ee ku daaweyneysa ama adeegga NHS 111 adigoo garaacaya 111.

## Waa maxay halista ka dhalan karta in sidaan wax loo maareeyo?

Halista la xiriirta daaweynta caafimaad ahaan waa in daawadu aysan shaqayn karin maadaama unugyada uurka ektoobigu ay sii wadi karaan in ay sii qaybsamaan, taas oo keeni karta inay weli jirto baahi qalliin. Dhakhaatiirtu waxay sheegi karaan haddii unugyada gaarka ah ee uurka ee soo saara hormoonka hCG ay weli wadaan in ay sii qeybsamaan sababtoo ah heerka hCG ayaa kor u sii kacaya oo aan hoos u soo deggeyn. Tan waxaa lagula socon doonaa baaritaannada dhiigga.

Heerka hCG wuxuu badiyaa kacaa maalinta afaraad ee baaritaanka dhiig maxaa yeelay ficilka daawada methotrexate ma ahan mid deg deg ah, sidaa darteed unugyadu waxay sii wadi doonaan inay kala qeybsamaan laba ama saddex maalmood ka dib markii duritaanka la bixiyay, unugyada qaarna waxay sii daayaan hCG badan markay bilaabaan inay baaba'aan . Dhakhaatiirtaadu waxay raadinayaan inay arkaan hoos u dhac ku yimaad qiimahaaga hCG ugu yaraan boqolkiiba 15% inta u dhaxaysa maalmaha afaraad iyo toddobaad. Haddii aysan dhicin hoos u dhac boqolkiba 15% ah, tani